

# *Warbixinta Kooban ee Hirgelinta Washington SEL: Ee Diirada Lagu Saarayo Hawlaha Dhaqanka Ilaalinaya*

## **Tixgalinta Hawlaha Dhaqanka Ilaalinaya**

Hawlaha Dhaqanka Ilaalinaya waa habab ay ardaydu ku xooggan yihiin dhaqankooda iyo aqoonsiga loo aqoonsanayo inay yihiin hanti lagu horumarinayo xirfadaha dareenka bulshada iyo aqoonta. Hawlahani waxay taageeraan guusha tacliimeed ee ardayda iyo dareenka badqabka iyagoo xaqijinaya meeshooda dhaqameed ee aduunka. Hawlaha Dhaqanka Ilaalinaya waxay si kutalagal ah u baadhayaan awoddha iyo mudhaanta, eexda qarsoon, iyo cunsuriyadda hay'adaha, kuwaas oo u adeega sida caqabadaha looga gudbi lahaa oo loo xaqijiyo kartida buuxda ee isbeddelka hawlaha social emotional learning (barashada dareenka bulsho, SEL).

## **Waa maxay Barashada Dareenka Bulshadu?**

Social emotional learning (Barashada dareenka bulshada, SEL) waxaa si weyn loo fahamsan yahay inay tahay hab ay dadku ku dhistaan wacyiga iyo xirfadaha maayinta dareenka, dejinta yoolalka, samaynta xidhiihada, iyo samaynta go'aamo masuuliyadeed oo taageeraya guusha dugsiga iyo nolosha. (Dheeho Hagaha Hirgelinta SEL ee gobolka Washington)

SEL **maaha** nidaam lagu gaadho "fasal" ama lagu aqoonsado hoos u dhaca, oo kaliya maaha manhaj ama waxyaabo dheeraad ah. Laakiin, SEL waa hab si kutalagal ah oo lagu dhisayo hantida ardayga.

SEL waxa ay u taageertaa **sinnaanta waxbarashada**<sup>1</sup> siyaabo badan: xoojinta horumarka ilmaha oo dhan, soo jiidashada dareenka dabeecadda bulsheed ee waxbarashada, horumarinta aaminaadda in carruurta oo dhami wax baran karaan, horumarinta xirfadaha dhalinyarada si ay ugu dhix noolaadaan xaaladaha bulshada, iyo hagaajinta xidhiihka ka dhhexeeya ardayda iyo macalimiinta —Qodobka ilaalinta waxyaabaha muhiimka ah ee **dhammaan** ardayda.<sup>2</sup>

## **Qaabdhismeedka SEL ee Gobolka Washington: Qodobbada Muhiimka ah iyo Xeerarka Hagidda**

1. Samee shuruudo si loo taageero ardayga SEL iyadoo loo marayo cimilada iyo dhaqanka.
2. SEL waxay u baahan tahay wada shaqayn dhix marta qoysaska, macalimiinta, shuraakada bulshada, iyo dhalinyarada qaabayntooda iyo hirgelintooda.
3. Dhis awoddha dadka waaweyn.

**Sinnaanta:** Ilmo kastaa waxa uu helayaa waxa ay u baahan yihiin si ay u horumariyaan awoododa maqan.

**Joogtaynta dhaqanka:** Dhaqanka waxaa loo arkaa kheyraad waxbarasho, ee looma arko caqabad.

<sup>1</sup> Sinnaanta waxbarashada macnaheedu waa in ilmo kastaa helo waxa uu u baahan yahay si uu u horumariyo awoodiisa aqooneed iyo baahida bulsho. Waxa laga soo xigtay wabsaaytka Mashruuca Sinaanta Qaranka:

<https://www.nationalequityproject.org/education-equity-definition>

<sup>2</sup> Jones, S. M., & Kahn, J. (2017). *Gundhiga caddaynta sida aan wax u baranno: Caawinta ardayda horumarkooda bulsho, dareen, iyo waxbarasho. Bayaanada caddaynta la isku raacsan yahay ee ka soo baxay Golaha Saynisyahannada Sharaftha leh*. Washington, DC: Machadka Aspen.



**Nashqada caalamiga ah:** Kala duwanaanshaha waxbarashada waa la qorsheeyay waana la waafajiyay.  
**Kawarqabka dhibaatada:** Aqoonta saamaynta dhibaatada waxa lagu daraa siyaasadda iyo qabashada.

### Heerarka SEL ee Gobolka Washington<sup>3</sup>

<b>Is-wacyigelinta:</b>	Shakhsigu waxa uu awood u leeyahay in uu aqoonsado dareenkooda, hantidooda gaarka ah, meelaha u baahan koriinka, iyo ilaha iyo taageerada dibadda ee iman kara.
<b>Is-maamulida:</b>	Shaqsigu wuxuu awood u leeyahay in uu xakameeyo dareennada, fikradaha, iyo dabeeecadaha.
<b>Is-aaminsanaanta:</b>	Shakhsigu waxa uu awood u leeyahay in uu naftiisa dhiirrigeliyo, uu adkaysto, oo uu isu arko qof karti leh.
<b>Wacyigalinta Bulshada:</b>	Shakhsigu waxa uu awood u leeyahay in uu aragtidiisa qaato oo uu u damqado dadka kale ee ka soo jeeda meelo kale iyo dhaqamo kala duwan.
<b>Maaraynta Bulshada:</b>	Shakhsigu wuxuu awood u leeyahay inuu sameeyo doorashooyin badbaado leh oo wax dhisi kara oo ku saabsan dabeeecadda shakhsii ahaaneed iyo isdhexgalka bulshada.
<b>Lashaqaynta Bulshada:</b>	Shakhsigu waxa uu awood u leeyahay in uu tixgeliyo dadka kale oo uu muujiyo rabitaan ah inuu gacan ka geysto wanaagga dugsiga iyo bulshada.

### Saamaynta Shakhsiyaadka

Si loo xoojiyo ilaalinta dhaqanka, macalimiintu waxay u baahan yihiin inay ka fikiraan caadooyinkooda dhaqameed iyo barbaarintooda markay ku hawlan yihiin barashada dhaqamada iyo halka ay kasoo jeedaan ardaydoodu. Macalimiinta—in badan oo asalkoodu ka duwan yahay ardaydooda—waa inay diyaar u yihiin inay aqoonsadaan sida qiyamkooda shakhsii ahaaneed, nidaamka caqiidada, iyo xeerarka saameeya ku-dhaqankooda waxbarida, luqadda, iyo tallaabooyinka ku aadan ardayda.

### Fursadaha Hawlaha SEL ee Ku Saabsan Sinnaanta

#### Is-wacyigalinta iyo wacyigalinta bulshada

Taageer ardayda si ay u horumariyaan aqoonsiga jinsiyadeed, qawmiyad, dhaqan, iyo luqaddeed ee wanaagsan iyo kobcinta garaadka ardayda, bulsho, iyo siyaasadeed.<sup>4</sup> Sii fursado lagu baadho oo la is barbar dhigo qiyamka ugu sarreeya iyo kuwa aan sareyn, sida shakhsii-nimada iyo ururinta. Ka caawi ardayda inay fahmaan sida jinsiyadda, fasalka, iyo aqoonsiga kale ugu meeleyaan si ka duwan goobo kala duwan. Ka caawi ardayda inay aqoonsadaan in awooddooda si ay u badali karaan dalabyadan isasoo taraya oo fariintuna waa xoojin.

Taageer macalimiinta si ay u milicsadaan sida aragtidooda dhaqameed ee aragtida dunida iyo eexashadu u saamayso isdhexgalka ardayda iyo qoysaska. Sii fursadaha macalimiinta si ay u horumariyaan hanuuninta dhaqan-bulsho, taariikheed, iyo sinnaanta ku wajahan shaqada ay la leeyihii ardayda.

<sup>3</sup> Barashada Bulshada iyo Shucuurta Kooxda Shaqaynta Baranaamijyada. (2016). *Wax ka qabashada barashada dareenka bulshada ee dugsiyada dawlada ee K-12 ee Washington*. Waa lagasoo xigtag <https://osp.k12.wa.us/sites/default/files/2022-12/selworkgroup2016report.pdf>

<sup>4</sup> Ladson-Billings, G. (1995). Ku aadan dhinaca aragtida barbaarinta dhaqanka ku habboon. *Majalada Cilmi-baadhista Aqoonta Maraykanka*, 32(3), 465–491.



## Is-maamulka iyo maamulka bulshada

Ka caawi ardayda si ay u horumariyaan xeelado la qabsiga si ay u maareeyaan walbahaarka soo noqnoqda, cadhooyinka yar-yar, iyo takoorka. Sii ardayda fursado ay ku falanqeeyaan sinnaan la'aanta muhiimka ah oo ku taageer iyaga habaynta dareenkooda iyo u gudbinta tamartooda xagga sinnaan la'aanta xooggan iyo u doodista naftooda, xulafadooda, ama bulshadooda.

Sii macalimiinta fursado ay si qoto dheer u dhagaystaan khibradaha nolosha iyo aragtida ardayda. Taageer macalimiinta si ay isugu daraan universal design for learning (naqshadeynta caalamiga ah ee waxbarashada, UDL), ilaalinta dhaqanka, iyo hawlaha wargelinta dhaawaca. Ku dhiirigeli macalimiinta inay tiixgeliyaan sida siyaasadaha iyo dhaqamada dugsiga loo tarjumi karo oo loo hirgelin karo si kala duwan iyadoo ku xidhan aqoonsiga qofka, maadaama aanay hawshu dhedhexaad ahayn.

## Is-rumaysnaanta iyo hawlaha bulshada

Ku taageer ardayda horumarinta dareenka waxtarka wadajirka ah adiga oo la shaqeynaya kuwa kale si ay uga hortagaan caddaalad-darrada oo ay u abuuraan isbeddel wanaagsan - tusaale ahaan, iyada oo loo marayo cilmi-baadhista tallaabada dhalinyarada. Sii ardayda fursado ay kaga qeyb qaataan fasalka, dugsiga, iyo go'aan qaadashada bulshada.

Caawi macalimiinta si ay u horumariyaan xidhiidh wanaagsan, aaminaad leh oo lala yeesho ardayda aqoonsigooda iyo asalkoodu ka duwan yahay ta macalimiinta. Ku dhiirigeli macalimiinta inay ka tarjumaan sida ay u siin karaan ardayda fursadaha xoojinta wadajirka ah iyada oo loo marayo ka qeybgalka bulshada. Sii macalimiinta fursado si ay ula shaqeyyaan kuwa kale si ay kor ugu qaadaan korriimadooda.

## Khayraadka SEL ee Diiрада Lagu Saarayo Sinnaanta

Barashada Dareenka Bulshada iyo Dhibaatooyinka Qarsoon ee Sinnaanta iyo Tallooyinka:  
[\(Mashruuca Sinaanta Qaranka\)](#)

Dhisida Xidhiidhada Qabiilada: Nidaamka Maxaliga ah ee Wadatashiga ESSA:  
[Qoraalka La tallinta Qabiilka](#)

Barashada Bulshada iyo Dareenka ee Dugsiyada Washington, dhisidda aasaaska iyo xeeladaha:  
[SEL Qeypta Onlaaynka ah](#)

Warbixin kooban oo ka timid Wallace Foundation oo baadhista si degdeg ah ee laga bartay xeeladaha SEL:

[Hawlaha Kernels ee SEL: Kharash jaban, Xeeladaha Culayska Yar](#)

Hage i tus oo i taabsii ah oo uu leeyahay dugsiga hoose iyo wakhti ka baxsan dugsiga kaas oo eegaya gudaha iyo dhammaan 25 barnaamijyada SEL ee uu hormuudka ka yahay:

[Wax ka badalista SEL ee Ka Baxsan Gudaha](#)

Sharciga



Marka laga reebo meebleed kale oo lagu xusay, [Sharaxaada Bulshada iyo Ururada Dhalinyarta oo ay](#) sameeyeen [Washington Office of Superintendent of Public Instruction \(Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha\)](#) ee ay Kooxda Shaqada SEL taasoo ku hoos jirta sharciga [Astaanta Sharciga ee Hal-aburuka Guud 4.0 Sharciga Caalamiga ah](#). Dhammaan astaamaha iyo calaamadaha ganacsiga waa hantida milkiilayaashu leeyihiin.

*Khayraadkan waxaa laga yaabaa inuu ka koobnaado linkiyo wabsaaydada ay maamulaan dhinacyo saddexaad. Linkiyadan waxa loo bixiyay in lagugu hagaajiyo oo kaliya kamana dhigna ama ma maldahdo wax taageero ah ama la socodka OSPI.*

*Haddii shaqadan la waafajiyo, ogow isbeddellada la taaban karo oo dib-u-noqoshada, ka saarida astaan kasta oo ah Washington Office of Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha) Sii sifada soo socota: Kheyraadkan waxaa laga soo minguriiyay agabkii asalka ahaa ee ay bixisay [Washington Office of Superintendent of Public Instruction \(Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha\)](#). Qalabka asalka ah waxaa laga yaabaa in si xor ah loo galo [OSPI Wabsaaytka Barashada Dareenka Bulshada](#).*

